



UNITED NATIONS ASSISTANCE MISSION IN SOMALIA (UNSOM)

War Deg Deg Ah

WARSAXAAFADEED 04/2013

Ergeygga Qaramadda Midoobay oo Booqday Buntland

Garoowe, 13 July 2013 – Ergeygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramadda Midoobay (SRSG), Nicholas Kay, ayaa booqasho ku yimid Garoowe, Buntland, aroornimadii maanta, taasoo ah booqashadii ugu horeysay ee uu ku tago Puntland tan iyo markii uu qabtay xilka madaxa Hawlgalka Qaramadda Midoobay ee Kaalmada Soomaaliya (UNSOM) 3dii bishii June.

Markuu ka soo degay Garoowe, Ergeygga Gaarka ah Nicholas Kay wuxuu yiri: “Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan booqdo Buntland oo aan la kulmo Madaxweynaha Buntland Cabdiraxmaan Maxamed Faroole. Buntland waxay kaalin weyn ka qaadatay dadaalkii loo galay dhammeynta xilligii ku-meelgaarka ee Soomaaliya, waxaana ku hanwynahay inay sii wado qaybta wanaagsan ee ay ka qaadato taageeridda marxaladda ka dambeysa ku-meelgaarka iyo nabadaynta.” Wuxuu sidoo kale uga tacsiiyeyay dadka iyo maamulka Buntland geeridii ku timid Alle ha u naxriisee Boqor Cabdullaahi.

Kulankii uu la qaatay Madaxweyne Cabdiraxmaan Maxmuud Faroole iyo mas’uuliyiinta kale ee sarsare, Ergeygga Gaarka ah Nicholas Kay wuxuu sharax ka bixiyay xilka loo igmaday UNSOM oo ah in taageero loo fidiyo dhisidda tayada qaranka, nabadaynta, maamul wanaagga, dibu-habaynta waaxaha amniga, ku dhaqanka sharciga, xuquuqda aadanaha, “ergeyn” dhexdhexaadin ah iyo dibuheshiisiin siyaasadeed iyo isku xirka iyo isuduwidda gargaarka caalamiga.

For more information, please contact UNSOM Spokesperson Anne Mugisha Bwomezi

Tel: +254 41 350 8656 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Follow UNSOM on:

www.unsom.unmissions.org



@UNSomalia



facebook.com/UNSomalia

Inta uu ku gudda jiro booqashadiisa, Ergayga Gaarka ah wuxuu wareejindoonaa (ku wareejinayaa masuuliyiinta Gobolka) xafiisyo ay UNDPda u dhistay Xeer-ilaaliyaha Guud iyo Guddiga Garsoorka, mashruucan wuxuu kamid yahay mashaaricda loogu fududeynayo ummadda sidii ay ku gaari lahaayeen cadaaladda. Ergayga, waxa kale ee uu la kulmi doonaa Afhayeenka Baarlamaanka Buntland, xubno ka socda bulshada rayidka iyo Guddiga Ku-Meelgaarka ee Doorashada Buntland. Wuxuu caddeeyay inuu rajeynayo in doorashooyinka dowladaha hoose ee lagu wado in la qabto 15ka July loo qaban doono si nabad ah. “Hanaanka dimuqraadiyeynta Buntland waa muhim. Dabcan, mar walba waxaa jira wax dheeraad ah oo loo baahanyahay in la barto. Xafiiska UNSOM ee Garoowe wuxuu maamulka iyo bulshada rayidka kala shaqeyn doonaa dhammaan arrimaha la xiriira waajibkeena iyo xilka naloo igmaday”, ayuu yiri.